HAA ANIGA TN WAA LA I XISAABIYAA!

Waa maxay Tirakoobka 2020?

Maxay Muhiim u Tahay? 02

- Si la mid ah sida aan u lacagteena aan u miisaaniyayno iyadoo lagu saleynayo baahiyaha iyo tirada inta qof ee qoyskeenu ka kooban yahay, dowladduna waxay u baahan tahay inay hesho macluumaadka Tirakoobka si loo go'aami-yo sida loo qoondeeyo deeqda dhowr barnaamijyo ee ka jira jaaliyadeena, sida:

Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka
Barnaamija Caymiska Medicaid, WIC, daryeelka ilmaha, iwm.

Kaabayaasha Dadweynaha
Dhismaha iyo dayactirka waddooyinka, Gaadiidka dad-waynaha

Waxbarashada Dad–weynaha
dhismaha iyo dayactirka iskuulada dad-weynaha, waxbarashada gaarka & waxbarashada dadka waaweyn

Guryaha Dowladda
Barnaamijyada kaalmada guryaha ee dadka daqligoodu hooseeya

- Intiiba uu saxan yahay xisaabta Tirakoobka ee dadka la xisaabiyo taas ayaa waxay ka dhigan tahay in jaaliyaddaheena ay helayaan deeq badan oo ay heli doonaan 10ka sano ee soo socota!

Amaanka Xogta Qofka 04

- Sida sharciga waafaqsan, macluumaadka ama xogta Tirakoobka waxaa kaliya loo adeegsan karaa ujeedooyin tirakoo kaliya. Macluumaadka u gaarka ah shaqsiga ee ay aruuriso Laanta Tirakoobka la lama wadaagi doono waax kale ee dowladda ka tirsan.
- Macluumaadka tirakoobka ee qofka lama shaacin karo muddo 72 sano ah (oo ay ku jiraan magacyada, cinwaannada, iyo lambarrada taleefannada).
- Dadka u shaqeeya tirakoobka waa la dhaariyay oo waxaa lagu dhaariyay inay ilaalin doonaan macluumaadkan; haddii ay jabiyaan sharciga dowladda federaalka waxaa loo tixaabi karaa xabsi ama waxay bixin karaan ganaax weyn!

Goormee ayaan Buuxinayaa Foomkayga Tirakoobka ee 2020? 06

- **Bartamaha bisha Maarso 2020 -** Dadku waxay bilaabi karaan inay uga soo jawaabaan ama ka soo sameeyaan jawaabahooda tirakoobka qatka internet-ka iyo taleefanka; foomamka waraaqaha ah ayaa loo diri doonaa qoysaska meelaha ay ku yar yihiin qatka internetka ama kuwa soo codsada.
- **Maajo 2020 -** Agoosto 2020 - Dabagal kuwa aan ka soo jawaabin: Qof kasta oo aan ka soo jawaabin ama aan soo buuxin foomka tirakoobka marka la gaaro dhamaadka bisha Abriil 2020 waxaa soo booqan doonaa shaqaale ka socda Laantaa Tirakoobka inuu dabagal ku sameeyo oo uu ka caawiyo buuxinta buuxinta foomka tirakoobka.

Waa maxay Tirakoobka 2020? 01

- Dastuurka Mareykanka u degsan ayaa wuxuu farayaa in dowladda federaalka ay tiriso qof kasta oo ku nool dalka 10 sano kasta mar la xisaabiyo dadka.
- Tirakoobka waa in lagu daraa oo la xisaabiyaa dadka da' kasta, jinsi kasta, iyo qowmiyada kasta isugu jira; dhammaan dadka dhalashada haysta iyo kuwa aan dhalashada aan haysan, iyadoon loo fiirinayn xaaladdooda soo galootini-mo. In qof kasta la xisaabiyo waa waajib oo waa mas'uuliyad oo qof kasta ay saaran tahay.

Yaa La Xisaabiyaa? 03

- Qof kasta oo aqalka qoyska degan waxaa loo baahan yahay in la xisaabiyo!
- Dhammaan xubnaha aqalka qoyska oo ay ku jiraan dhammaan ilmaha dhallaanka, carruurta, ardayda kulliyada dhigta, dadka qaangaar ah, ehelada, saaxiibbada, saaxibbada carruurta, waalidiinta-waalidiintooda, sodaha/sodahda, iwm., iyadoon loo fiirinayn da'da qofka ku jiro iyo xaaladooda sharciga ee wadanka ay ku joogaan.

Sidee Baad U Buuxin Kartaa? 05

- Tirakoobka waxaa laga heli doonaa khadka internetka, dhanka telefoonka, iyo iyadoo warqad ah oo la buuxinayo.
- Foomka Tirakoobka ee internetka laga buuxiyo waxaa lagu heli doonaa oo lagu diyaariyay 13 luqadood ama af oo kala duwan. Sidoo kale Tirakoobka waxaa lagu buuxin doonaa qatkha telfoonka iyadoo lagu diyaariyay 59 luqadood ama af Waxaa qatka internetka aad ka heli doontaa hage kuu tilmaamaya sida loo buuxiyo tirakoobka iyadoo lagu diyaariyay 59 luqadood ama af.
- Marka aad buuxinaysid tirakoobka hubi in aad ku qortay qof kasta oo guriga ku nool in la xisaabiyay.

Maxaa Dhacaya haddii Aadan Buuxin Foomka? 07

- Shaqaalaha ka socda laanta tirakoobka ayaa u imanaya gurigaaga si uu kaaga caawiyo in aad buuxiso foomka haddii aadan buuxin tirakoobka marka la gaaro dhamaadka bisha Abril 2020.

Ma Ogeyd...

- Tirada hogaamiyaasha la soo doorto ee deegaanka, gobolka, iyo dowladda dhexe ay ku xiran tahay xisaabta Tirakoobka?
- Waxaa dhici karta in Tennessee ay hesho 1 kursi oo dheeraad ah ee Wakiillada Aqalka Mareykanka taas waxaa sabab u noqon kara Tirakoobka 2020.
- Sidoo kale Degmooyinka dib ayaa loo qoraa iyadoo la isticmaalayo xogta Tirakoobka. Tani waxaa ka mid ah: Degmo Dugsiyeedka | Golaha deegaanka degmada | Wakiillada Gobolka | Kongareeska Mareykanka

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah soo wac
615-414-1030 ama
Cesar Bautista iimeel ugu soo dir cesar@tnimmigrant.org

TENNESSEE Immigrant & Refugee Rights COALITION
La Paz CHATTANOOGA
LATINO Memphis
centro HISPANO • DE EAST TN